

Xeerka Wasiirka Garsoorka iyo Caddaaladda

3 Luulyo 1969, ee Lr.142.

Wakaalad, Xoghayaha Dawladda, loo siiyey in uu adeegsado awoodaha iyo ikhtisaaska Wasiirka Garsoorka iyo Caddaaladda, gaar ahaan arrimaha la xiriira Nidaamka Garsoorka iyo Nidaamka Notaayada.

WASIIRKA

MARKUU ARKAY qodobbada 79 iyo 83 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Shaciga Lr.14 ee 1962, oo ku saabsan Nidaamka Xukuumadda iyo isbeddellada dambe ee lagu sameeyey:

MARKUU TIXGELIYEY baahida loo qabo in loo wakiisho Xoghayaha Dawladda ee Garsoorka iyo Caddaaladda, xilalkeeda qaar, gaar ahaan xagga wixii ku saabsan Nidaamka Garsoorka iyo Nidaamka Notaayada;

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKAN

Qodob kaliya

Ayada oo uu isla markaas dhaqangelayo, waxaa Xoghayaha Dawladda, ee Wasaaradda Garsoorka iyo Caddaaladda, Mudane Cabdullahi Xaaji Maxamuud «Insaaniya», loo wakiishay gudashada xilaalka iyo awoodda Wasaaradda Garsoorka iyo Caddaaladda ee la xiriira:

a) Nidaamka Garsoorka, sida ku qeexan qodobbada 2, faqradda shanaad (dhisme laamo madani oo ka mida Maxkamadda Degmada, ee ka baxsan xarunta; 19, faqradda kowaad iyo saddexaad (gelitaanka Garsoorka iyo go'aminta isu-dhignaanta shahaadooyinka waxbarashada); 24, faqradda labaad iyo saddexaad (beddelka iyo oggolaanshaha dacwad ku oogiddooda), marka laga saaro Garsoorayaasha Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Racfaanka iyo Xafiiska Xeerilaaliyaha; 26, faqradda kowaad (magacaabidda la-taliyayaasha); 28, xarafka (c) ee faqradda labaad (go'aanka anshax-marinta lagu qaado Garsoorayaasha iyo shaqaalaha kaaliyayaasha ah; marka laga saaro Garsoorayaasha aan ahayn muwaadiniin Somaaliyeed; 32, faqradda labaad (dhisidda ku meel gaarka, ee laamaha Maxkamadaha Racfaanka ee Muqdisho iyo Hargeysa) ee Nidaamka Garsoorka oo lagu ansixiyey Xeerka Sharciyeed Lr.3, ee 12 Juunyo 1962;

b) Nidaamka notaayadeed; iyo

c) Xil kasta oo kale oo loo arko in uu habboon yahay.

Muqdisho, 2 Luulyo 1969.

**WASIIRKA
Aaden Shire Jaamac**